

## **Xeerka L. 259 rep**

**Baab'iinta Wakaaladda Madaxbannaan ee Carwada Soomaliya iyo u wareejinta hawlaho Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya.**

### **MAAMULKA WASAAYADDA TALYAAANIGA EE SOOMAALIYA**

#### **MAAMULAHA**

Marka uu arkay Dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 97 Maajo 1952, lamba. 2357;

Marka uu arkay dekereetda lamba. 71 rep ee 23 Disember 1952 ee lagu dhisay Wakaalad Madax bannaan ee Carwada Soomaliya;

Marka uu arkay dekereetada lamba. 258 rep 23 Disember 1955 taaso lagu aqoonsaday shaqsiyadda sharchiyeed Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya

Marka uu garowsaday habboonaanta in la baabi'yo Wakaaladda Madaxbannaan ee Carwada Soomaliya si loogu dhiibo hawlaho iyo ulajeedooyinka Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya taaso ku bixinaysa qaybaheeda "Bandhiga, Carwqda iyo Suuqyada" lagu sheegay qod. 12 ee Xeerka dhismaha;

### **WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

#### **Qod. 1**

Wakaaladdii Madaxbannaneed ee Carwada waa la baabi'iyay;

#### **Qod. 2**

Hawgalladii iyo wixii nuqsaan ay lahayd waxaa loo wareejiyay Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya.

Iyagu waxay samaysanayaan maamul maaliyadeed iyo hantiyeed oo gaara, si ay u ballan qaaddo xilalkoodi asalka ahaa.

Xisaabaadkoodi iyo xaaladahooda waxaa la horgeeynayaa oo lagu lifaaqayaa miisaaniyadda kutalagalka iyo xisaab xirka Rugta Ganacsiga.

#### **Qod. 3**

Dekereetadaan waxay dhaqangalaysaa marka lagu baahiyoo Faafinta Rasmiga ee AFIS.

Muqdisho, 23 Disember 1955.

Maamulaha

**Anzilotti**

La hubiyay iyo lagu diiwaangeliyay – Diw. lamba 12 – bogga lamba. 233

Muqdisho, 31 Disember 1955.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**